2

Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska

SOM 002

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO

Dumarka oo dhan. Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.

Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, raadso la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska" oo ku qoran shabakadda www.onefamilylaw.ca.

Gobolka Ontario waxaa u degsan sharciga ah "the *Child and Family Services Act* (CFSA)", si caruurta looga badbaadiyo dacdarreynta. Sharcigan wuxuu qeexayaa wixii ay ku jirto caruurta dantooda, sida loo badbaadiyo caruurta iyo hubinta in caruurta la daryeelay.

Dowladda waxay maalgelisaa hay'adaha u qaabilsan daryeelka caruurta kuwaas oo lagu magacaabo Hay'addaha Gar-gaarka Caruurta "**Children's Aid Societies** (CAS)". Xilkooda wuxuu yahay in ay ka badbaadiyaan caruurta wixii dhibaato ah sida dayacidda oo kale. Hay'adaha xilkooda waxaa kaloo ka mid ah in ay caruurta u helaan qoys korsada, iyo in ay reeraha ku taakuleyaan waxqabadka caruurta. Xilkooda ugu weyn wuxuu yahay in ay ka shaqeeyaan wada noolaashaha qoyska, haddii laga maarmi waayana in caruurta ay guri kale u helaan.

Waalidnimadu waxay ku fareysaa in aad caruurtaada ka dhowrto wixii dhib ah, in aad ka haqab tirto baahidooda asaliga ah sida cuntada iyo hoyga. Hay'adda CAS haddii ay dareento in waajibaadkaas aadan gudan, way soo baari kartaa qoyskaada. Hay'adda CAS kolka ay baaritaanka soo dhameyso, haddii ay u aragto in canuggaada **uu badbaadin u baahan yahay**, way kaa qaadi kartaa.

"Badbaadin u baahan" macnaheeda muxuu yahay?

Canugga wuxuu badbaadin u baahanyahay haddii

- guriga looga tago kaligii, aan la daryeelin ama la dayaco.
- lagu xadgudbay ama ku dhow in lagu xadgudbo.
- canugga uu arko xadgudub dadka waaweyn isku hayo guriga dhexdiisa.

Xadgudub wuxuu noqon karaa dil, galmo iyo niyad jabin. Qofkuu rabo ha noqdo ku xadgudbaha canugga. Sharciga wuxuu ku farayaa in aad badbaadiso caruurtaada. Hay'adda way ku soo baari kartaa xitaa haddii aadan adiga ku xadgudbin canuggaada laakiin aad ogtahay in lagu xadgudbo ama xil kaa saarnaa in aad ogaato oo aadan wax ka qaban falkaas.

Mararka qaarkood haddii dumarka guriga jooga lagu xadgudbo, hay'adda CAS way soo dhex gashaa oo way baartaa. Hay'adda CAS waxay sidaas u sameyneyso waxay tahay in xadgudubka noocaasi ah uusan wax u dhimin daryeelka iyo badbaadada caruurta.

Haddii lagugu xadgudbo oo boliiska la waco, hay'adda CAS ayaduna guriga ayey imaaneysaa. Wareysi ayey la yeelaneysaa adiga iyo caruurtaadaba. Haddii hay'adda CAS ay dareento in aadan gudan xilkaadii ahaa badbaadinta caruurtaada, way kaa kaxeysan kartaa caruurta xitaa haddii aadan adiga ahayn ruuxa ku xadgudbay.

Sidee ayey hay'adda CAS u soo dhex gashaa reeraha?

Ruux kasta ee arka canug u baahan in la badbaadiyo waa in uu warbixin u soo gudbiyaa hay'adda CAS. Waxaa arrintan lagu magacaabaa **waajibka warbixinta**. Ruux kasta oo ka shaqeeyo daryeelka caruurta waa in uu hay'adda CAS u soo warbixiyaa haddii uu dareemo in uu jiro canug lagu xadgudbay ama la dayacay. Dadkan la faray waxaa ka mid ah macallimiinta, takhaatiirta, dadka hay'adaha bulshada u shaqeeyo, culamaa-udiinka iyo shaqaalaha caruurta xanaaneeyo. Dadkan haddii aysan u soo warbixinin hay'adda CAS dambi ayaa lagu qaadi karaa.

Waajibka warbixinta waa mid si joogta ah loo rabo. Taasi macnaheeda waxay tahay hadii ruuxaasi uu horey uga soo warbixiyey arrinta, haddana waa in uu soo sheegaa mar kasta uu arko canug lagu xadgudbay ama la dayacay.

Siyaabo kale ayey hay'adda CAS kuu soo fara gelin kartaa, sida marka aad adiga wacato in ay ku caawinto. Boliiska way wici karaan hay'adda CAS marka adiga iyo sayigaada aad isku xadgudubtaan oo aad boliiska wacataan.

Maxaa dhaca kolka hore marka ay hay'adda CAS soo dhex gasho reerka?

Tallaabada 1aad: `Hubsasho

Haddii uu ruux soo waco hay'adda CAS, marka horey hay'adda waxay **hubineysaa** in arrinta ay u baahantahay wax ka qabad iyo in kale. Taasi macnaheeda waxay tahay, hay'adda waxay qaadeysaa tallaabooyin lagu hubinaayo in warbixinta ay heleen ay tahay mid reerkaada lagu fara gelin karo iyo in kale. Mararka qaar hay'adda CAS waxay gaartaa go'aanka ah in aan tallabo laga qaadin arrinta waqtigan xaadirka ah maxaa yeelay waxay ku qanceysaa sida aad canuggaada u daryeeshid.

Tallabada 2aad: Baaritaan

Kolka tallabada hore ee hubsashada ah la sameeyo, hay'adda CAS waxay gaari kartaa go'aanka ah in arrinta la **baaro**. Haddii sidaas la garto, hay'adda CAS aqalkaada ayey imaaneysaa, wareysi ayey la yeelaneysaa adiga, saygaada iyo canuggaadaba. Hay'dda CAS waxay wareysi la yeelan kartaa oo kale dad ka baxsan aqalkaada sida reerkaada kale, macallimiinta dugsiga ama dariska.

Hay'adda CAS waxay baaritaankan u sameyneysaa in ay hubiso in canuggaada uu u baahanyahay badbaadin iyo in kale. Hay'adda CAS in ay ku baarto waa arrin dhab ah . Haddii aadan wax ka qaban arrinta, hay'adda CAS aad ayey kuu fara gelin kartaa. Qaad tallaabooyin muujinaayo in aad xallineysid dhibka jira.

Baaritaanka haddii uu dhamaado, hay'adda CAS waxay gaari kartaa go'aanka ah in canugga uusan waxba u baahneyn. Haddii sidaas la garto, tallaabooyin dambe oo la qaadaayo ma jirto.

Tallabada 3aad: Qorshaha wax ka qabadka

Hay'adda CAS haddii ay la noqoto in canuggaada uu badbaado u baahanyahay, waxay qaadaysaa "tallaabooyinka ugu fudud oo cidna wax u dhimaynin". Taas waxaa loola jeedaa, haddii ay suuro gal tahay hay'adda si toos ah ayey ula shaqeyneysaa reerkaada si aad u wada xallisaan dhibka jira canuggana uu aqalkaada u joogo.

Badaanaaba waxaa dhacda marka ay hay'adda la shaqeyneyso reerka, in ay heshiis qoraal ah kaa saxiixdo, heshiiskaas oo aad ku caddeyneysid sida aad u daryeeli lahayd canugga. Heshiiskan waxaa lagu magacaabaa heshiiska **qorshaha waxqabadka**. Latasho qareen, haddii ay noqoto in lagu weydiisto in aad saxiixdo heshiiskan qorshaha waxqabadka ah. Haddii aad diido in aad saxiixdo heshiiska qorshaha waxqabadka ama aad fulin weydo kolka aad saxiixdo, hay'adda CAS way ka kaxeysan kartaa canugga aqalkaada.

Badanaaba,marka la saxiixo heshiiska qorshaha waxqabadka, hay'adda CAS way la soconeysaa xaaladda reerkaada ilaa iyo in muddo ah si ay uu hubsato in canuggaada uu haysto daryeel fiican adiguna aad fulisay qorshahii laguu dejiyey.

Tallaabada 4aad: Kaxeysashada canugga

Haddii aad diido waxa ay hay'adda CAS ku fartay, ama hay'adda ay dareento in canugga uu halis ku jiro, way kaa **fogeyn** kartaa ama ka kaxeysan kartaa canugga aqalkaada. Canuggaada waxaa loo dhiibi doonaa ruux kale oo reerka ka mid ah, ama waxaa la geyn doonaa guri lagu xanaaneeyo ama guri caruur badan lagu xanaaneeyo.

Xadgudubka qaarkiis waa dambi. Xafiisyo badan oo ay hay'adda CAS leedahay waxaa u degsan sharci oranaayo ha la gaarsiiyo boliiska haddii la helo warbixin ku saabsan xadgudub dil ah ama galmo ah. Boliiska wuu baarayaa arrinta xadgudubka ah ee la soo gaarsiiyey wuuna ku oogi karaa dambi qofka wax ku xadgudbay. Dambigan boliiska soo oogay waa mid dheeri ku ah eedeyntii hore oo ay hay'adda soo jeedisay. Eedeyntan boliiska soo jeediyey iyo midda hay'adda way kala duwan yihiin oo isma burinayaan.

Kaxeysashada canugga kolka uu dhasho

Ha'adda CAS awood buuxda ayey u leedahay in ay kaxeeysato canugga kolka uu dhasho, haddii ay la noqoto in canuggaada uu badbaadin u baahanyahay, sida hay'adda CAS hadii ay caruur horey kaaga kaxeysatay sabab jirta awgeed, haddii aad isticmaasho daroogo ama khamriga aad si xun u cabtid ama aadan hoy lagu hoydo qabin ama aad deggantahay meel aan amaan ahayn. Sidoo kale waxaad halis u tahay in canugga lagaa kaxeysto haddii aad tahay hooyo aan qaan-gaar ahayn, haddii ay hay'adda CAS horey kuu soo xanaaneysay kolka aad intaa ka yareyd.

Arrinta canugga badbaadadiisa ah haddii ay maxkamad tagto

Nidaamka maxkamadda ee canugga lagu badbaadiyo aad ayuu u dhib badan yahay. Waa deg-degsiiyo. Hay'adda CAS haddii ay kaxeysato canuggaada waa in ay qaaliga maxkamadda hor geeyso arrinta muddo shan cisho ah gudahooda. Haddii ay arrintan oo kale ku qabsato, isla markiiba qareen kulataliya raadso.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. **Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)**
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaatada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Funded by: / Financé par :
Ontario

Xogwarranka ku qoran qoraaladan waa aragtida hay'adda FLEW sidaa darted dowladda Gobolka mas'uul kama ahan nuxurka qoraaladan.